SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 1070
WARQADDII 2AAD EE RASUUL 2:6-10

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub. Waxaannu caaway horey idiinku sii wadaynaa warqaddii labaad ee rasuul Butros oo aynu idiinku bilownay barnaamijkii kan inooga horreeyey.

Waxaanan idiin dul marnay warqaddan doodaha ka taagan iyo weliba mawduuca rasuul Butros warqaddan uu ku adkaynayo. Waxaana mawduuca guud ee warqaddan labaad laynoogu soo koobay cutubka 3:18, baalka 415 ee kitaabka Axdiga Cusub. Waxaana rasuulku, isagoo soo koobaya dulucda guud ee warqaddan labaad uu leeyahay sidatan:

"Laakiinse ku kora nimcada iy aqoonta Rabbigeenna ah Badbaadiyeheenna Ciise Masiix, Isaga ammaanu ha u ahaato haatan iyo weligeedba Aamiin."

SONG: REEL----CUT-----

Markii noogu dambaysay waxay inoo joogtay dhegaystayaal faalladii dheerayd ee aynu ka bixinnay aayaddii shanaad ee isla cutubka labaad ee Warqaddan labaad ee Rasuul Butros. Waxaanan qaadaa-dhiganay sida qalbiyada dadku ay ahaayeen, oo welibana ay yihiin ilaa iyo maalinka maantay ah. Haddaba qorniinku wuxuu leeyahay, **"Rabbiguna wuxuu arkay in dadka sharkiisu u badan yahay dhulka, iyo in male kasta oo fikirrada qalbigiisu ay shar keliya yihiin had iyo goorba."**

Waxaa dhulka ku badnaa sharka xilligii Nuux, oo Ilaahna wuxuu goostay inuu dadkii waagaas ciqaab dusha ka saaro. Welibana ciqaabtu digniin la'aan ma imanin, wuxuuna soo af-jaray fallaagannimadii taanayd, wuxuuse badbaadiyey Nuux iyo reerkiisii. Haddaba Ilaah wuu ku qumma-naa inuu ciqaab dusha uga tuuro dadkii waagaas, waayo wuxuu maanka ku hayey mustaqbal wanaagsan oo ay heli doonaan dadka Daadka dabadii.

Haddaba markii aad u fiirsato wixii dhacay, waxaad arkaysaa in Ilaah wakhti dheer u dul-qaatay dembiyada dadku ay galayeen, ilaa la soo gaaro wakhti iyaga oo dhaniba uu halaag ku soo dego. Haddaba, wixii ka dambeeyey halaaggii ama aafadii Daadkii wakhtigii Nuux, ayaa waxaa Ilaah sharci u soo dejiyey dadka si uu wax uga qabto sharcidarr-adii iyo sharkii dadka, waxaana Rabbigu bixiyey amar sida ku qoran isla kitaabka Bilowgii 9:6, oo leh:

"Ku kasta oo nin dhiiggiisa daadiya, nin baa isna dhiiggiisa daadin doona: waayo, Ilaah araggiisuu

ka sameeyey ninka." Haddaba miyaanay wax laga xumaado ama yaqyaqsado noqonaynin marka qabiil, qabiil kale ku duulo, oo kuwa aan waxba galabsan loo laayo aano qabiil ama qof shakhsi ahi horey u galay? Sababtaas aawadeed waxaa dhaqangal ah sharcigan leh:

"Ku kasta oo nin dhiiggiis daadiya, nin baa isna dhiiggiisa daadin doona." Waxaan garanaynaa sida dad badan oo wax soo laayey, haddana iyagiina loo laayey, iyadoo ay ugu wacan tahay aano loo haysto. Waxaa dadku ay doonayaan inay ka aarsadaan kuwii waxyeelay qaraabadooda, haddaanay jirin awood xukun caddaalad ah oo dadka si xaq ah ugu kala garsoora.

Waana sharci-wanaagsan in ninkii nin dilaa, isagana la dilo, sidii ay ahaan jirtay wakhtigii kacaanka. Markii haddaba sidaas laysku raaco, ayaa waxaa bilaabanaya in dadku ay xushmad u hayaan qiimaha nolosha aadmiga. Waxaa Ilaaheennu leeyahay: **"Waayo Ilaah araggiisuu ka sameeyey Ninka."** Waxaa taasu ka macne tahay in Ilaah dadka ka uumay araggiisa iyo in nolosha aadmigu ay qiimi weyn oo saa'id ah u leedahay Isaga.

Xukuumaddii markaa bilowda inay marmarsiinyo u raadiso nin wax dilay, ayaa sia cad ka hor imanaya sharciga Ilaah ee ahaa, **"Ku kasta oo nin dhiiggiisa daadiya, nin baa isna dhiiggiisa daadin doona."** Sharcigaas mid lagu xad-gudbi karo maahan, haddaan caddaalad la samayn, qofkii wax laga dilay baa bilaabaya inuu ka aarsado kii wax dilay.

Kii aarsaday ayaa isna waxaa ka aarsanaya ilmihii ninkii la dilay ee aanada galay, oo dagaalku

sidaas ayuu ku soconayaa, oo innaba demi maayo, maxaa wacay waxaa xukuumaddu ay xajin weyday amarka ah in ninkii nin dhiiggiisa daadiya isna dhiiggiisa la daadiyo. Waxaa kaloo jira beryahay dad doonaya inay u naxariistaan dembiileyaasha.
Balse naxariis ma leh nin qof dhiiggiisa si qasab ah u daadiyey, waayo Ilaah innaba ma cafiyo dhiigga dadka. Dadka dunida waxaa ku batay sharkii, oo Dadkayaguna kama reebbana. Waxaa soo batay burcaddii, oo waxaa kordhay cadaawaddii dadku isku hayey, iyadoo taasina ay sal u tahay inaan la xajinin sharciyadii Ilaah. Waxaad arkaysaa nin dilaa ah oo dadku ka baqo, oo waayeellada ama cuqaasha ama ugaasyadu ay ka baqaan.
Maxay uga baqayaan? Waxay uga baqayaan nafsaddooda, weliba iyaga qudhoodu iskuma xirna oo waxay gooyaan gar-eexo. Sababtaas aawadeed ayaa deegaankoodu wuxuu noqday meel cabsi badan. Waxaa loo baahan yahay in dadku taageeraan xukuumad waliba ee ay doortaan, waxaana sharciga hirgaliya dadka iska leh dalka, ee dibadda sharcigu kama hirgalo.
Markaa go'aan ku gaara inaad iska qabataan, oo jeelasha u taxaabtaan tuugada, idinkoo aan sidaas u yeelaynin inaad qolo cadow idiin ah aad ka aarsataan, laakiin u yeelaya in la helo xukuumad caadil ah oo dadka oo dhan ka wada dhexaysa.
Ingriisku wuxuu yiraahdaa:
"Charity begins at home, and Justice, next door."
Haddaan Soomaali ka dhigo maahmaahyada ayaa macnuhu noqonayaa: **"Ixsaanku wuxuu ka bilowdaa**

gurigaaga ama deegaankaaga, Caddaaladdana iridda kugu dheggan ama xigta." Haddaba saaxiib, Sayid Ciise Masiix qudhiisa ayaa wuxuu leeyahay: **"Qalbiga dadka waxaa ka yimaada shar oo dhan."** Waxaa ka mid ah sharmuudnimada, qaniisnimada iyo qalooca kale ee dadka.

Waxaan kuugu leeyahay haddaanay dembiileyaashu helin sharci xakameeya iyo asluub, waxba kama duwanaan doono qarankeenna kii wakhtigii Nuux, oo ciqaabtuna way ina saaran tahay maanta. Haddii qofi aanu gurigiisa daafacan karin inuu qori haysto mooyaane, ama uusan maalkiisa dhowri karin, inuu saanad xoog leh haysto mooyaane, miyaanay ciqaabtu ina saarnayn saaxiib, oo miyaan laynaga abaal-marinin quursashadii sharciga Rabbiga?

Bal aynu dib ugu soo noqonno meeriska cutubka 2aad ee Warqadddan labaad ee rasuul Butros, waxaanan idiin akhrinayaa 2:6, baalka 412 ee Axdiga Cusub, waxaana Qorniinka qoduuska ahi leeyahay sidatan:

"Oo magaalooyinkii ahaa Sodom iyo gomorana wuxuu ka dhigay dambas, oo intuu afgembi ku xukumay, ayuu masaal uga dhigay kuwii cibaada-laawayaal noqon lahaa."

Waxaa halkan laguugu sheegayaa in sharcidarrada iyo qalooca dadka ee ka yimaada qalbiyada dadka horey dadka loogu ciqaabay, welibana haatan loo ciqaabi doono haddii ay jirto qoomiyad sidaas ah. Wixii ku dhacay Sodom iyo gomora ayaa waxay ku qoran yihiin kitaabka Bilowgii cutubka 19aad. Waxaana Ilaah xukun ku soo dejiyey wakhtigii Sodom iyo Gomora, jidhka dadka.

Dadkii halkaas deggenaa waxay wada ahaayeen, marka

laga Reebo reerkii Luut, khaniisiin, oo waxaa khaniisnimada oggolaaday xukuumadihii ka talinayey Sodom iyo Gomora. Waxay ahayd wax sharci ah in dadku sameeyaan wax waliba ee ay qalbiga kaga fakaraan, oo waxaa ka jirtay Dimoqoraadiyad isla sida dalal badan oo dunida ahiba ay sameeyaan.

Haddaba jidhku waa wax qurun ah haddaan la maarayn, oo wuxuu dadka gelinayaa sharnimo ay tahay in Ilaah ciqaab kaga jawaabo. Waxaan markaa aniga rumaysa-nahay in khaniisnimadu tahay wax dadka shafarta ka qaada, oo aan lagu arag wax qofka aadmiga ah sharaftiisa iyo karaamadiisa dhisa, laakiin maaddaama ay ka fog yihiin Ilaah, waxaa soo yaraanaya damiirkoodii iyo weliba is-celintoodii ama adkaysigoodii. Rasuul Bawlos qudhiisa ayaa goob-joog u ahaa wixii ka socday boqortooyadii reer Rooma. Dhicitaankii boqortooyada reer Rooma ayaa waxaa sal u ahaa marqaan iyo macsi. Rasuul Bawlos maaddada khusaysa Damiir-xumadii Rooma ka socotay wuxuu uga hadlay Warqaddiisii reer Rooma 18:-32. Haddaan dhegaystayaal horey idiinku sii wadno Warqaddii labaad ee rasuul Butros cutubka labaad, ayaannu imminkaa idiin akhriyayaa aayadaha 7-8, baalka 413 ee Axdiga Cusub, waxaana Qorniinka qoduuskaahi leeyahay sidatan:

"Oo wuxuu ka samatabbixiyey Luut kii xaqa ahaa oo aad loogu saxariiriyey sharcilaawayaashii dabiicaddoodii nijaasta ahayd. Waayo, ninkaas xaqa ahaa iyaguu dhex degganaa, oo waxaa naftiisii xaqa ahayd maalin ka maalin silciyey camaladooda

sharciga ka geesta ahaa markUU arkay oo maqlay." Wuxuu qorniinku leeyahay, **"Oo wuxuu ka samatabbixiyey Luut kii xaqa ahaa oo loogu saxariiriyey sharcilaawayaashii dabiicaddoodii nijaasta ahayd."** Haddaba waxaa lagu saxariiriyey inuu goob-joog ka ahaado xumaanta ay maalin waliba hortiisa ku samaynayaan. Markii aad eegto Kacaankii Hanti-wadaagga ahaa ee Soomaalidu lahayd, ayaa waxaa la saxariirin jiray kuwa ka soo horjeeda mabaad-iida kacaanka.

Haddaba waxaa nebi Luut aga silciyey xagga nafsadda, oo kuma faraxsanayn sharci-darradii, iyo sinadii ka dhex socotay irdaha magaalada Sodom iyo Gomora. Ha yeeshee markii qofku akhriyayo kitaabka bilowgii, ayaad mooddaa in qudhiisuba uu ahaa nin lax-jeclo badan, oo u nugul waxyaabaha nafsaddu jeclaysato. Waxaan garanaynaa in Luut qudhiisu doortay inuu dego Sodom iyo Gomora oo ahaa dhul barwaaqo badan.

Luut markii uu magaalada soo degay wuxuu ka mid noqday siyaasiyiinta magaalada, oo waxaa halkaa ku lumay qaar ka mid ah qoyskiisa. Hadii aanan arki lahayn qidcadan rasuul Butros waxay ila noqon lahayd in Luut aanu badbaadin, ama uusan ka mid ahayn muuminiinta Ilaah. Weliba waxaa qorniinka inoogu qoran qisadii gabdhihii Luut, kaddib markii iyaga iyo Luudba laga samatabbixiyey burburkii magaalada Sodom iyo gomora. Markii haddaba la tago jannada ama Sayidka kor lagula kulmo, ayaa waxaa la arki doonaa laba sheey oo dadka ka yaabiya.

(1) Waxaa jannada laga waayi doonaa dad ay la ahayd inay ahlu kheyr yihiin oo ay u xaqiiqsanayd

inay jannada gelayaan.
(2) Cajaa'ibka labaadina waxaa weeye in kuwo ay la ahayd inayan janno arkayn oo ay la ahayd weliba inayan ahlu-kheyr ahayn, ay arki doonaan iyagoo jannada ku jira. Luutna wuxuu ka mid yahay qoonka dambe. Ilama ahan in Luut lahaa wax uu Ilaah la hor yimaado ama markhaatifur shegaya inuu isagu ahaa nin Ilaah waxyaabo badan oo wanaagsan u sameeyey.
Habase yeeshee isagu kuma uusan darsain kuwii xumaanta samaynayey, oo welibana wuxuu u muuqday sida nin la saxariirin jiray. Waxaa lagu saxariiriyey caddaaladdarro, iyo in weliba aan isaga la maqlin xitaa haddii uu tala wanaagsan u soo jeediyo dadka.
Wuxuu rasuul Butros, oo u markhaati furaya Luut leeyahay: **"Oo wuxuu ka sabatabbixiyey Luud kii xaqa haaa oo aad loogu saxariiriyey sharcilaawayaashii dabiicaddoodii nijaasta ahayd."** Inkastoo aanay jirin wax Luud uu sameeyey oo markhaati fur ah, ayaa haddana Luud Ilaah ugu markhaatifuray dadkaas hortooda sida hufan ee uu u noolaa. Maahanyn nin sameeya shuqulladooda sharka ah kamana qayb qaadan xaqdarradii lagu yaqaannay reer Sodom iyo Gomora. Adiga qudhaada waxaad Ilaah ugu markh-aati furi kartaa sida aad u nooshahay. Miyaad ka qayb-qaadataa dembiyada tolkaa ay gelayaan iyo xasuuqa, mise Ilaah hortii waad ku qumman tahay oo waad ka soo hor-jeeddaa wax waliba ee deegaannadaada ka dhacaya?
Haddaba waxaad Qorniinku leeyahay Luut wuxuu ahaa nin xaqa ah iyadoo ay ugu wacan tahay rumaysadkii

uu Ilaah ku qabay, laakiin noloshiisa marka la eego wuxuu kala kulmay magaalada soddom qaxar dhib iyo rafaad. Waxaa magaalada ku saxariiriyey rag inkaar qabayaal ah, oo aan jeclayn wanaagga iyo samaha, laakiin ku raxaysta wax waliba ee Ilaah neceb yahay.

Markii ay haddaba samaynayaan waxyaalaha Ilaah karho ayey naftiisa saxariirinayaan.

Waxaa markaas Ilaah ku leeyahay Luut isaga soo tag magaalada, iyaga waan burburinayaa, adigana waan ku badbaadinayaan. Waxaa isla markaa halkaa ka dhowaa nin la oran jiray Ibraahim. Ninkaasu ma dhaleecaynin Luut, laakiin wuu u soo ducaynayey in Ilaah ka samatabbixiyo halaagga magaalada ku soo socday.

Waxaa haddaba jira dad jecel inay dhaleeceeyaan qof waliba. Waxay jecel yihiin inay waxyaabo xun-xun ka sheegaan dadka kale, laakiin iyaga waxay isla yihiin sida nima qoduusiin ah oo weliba hufan. Waxaanay la tahay in dadka kale oo dhan aan laga helayn nin Ilaah ugu adeegi kara sida ay iyagu ugu adeegaan. Habase yeeshee nimankaas oo kale waxaa la doonayaa inay is-weyddiyaan, **"Miyaannu kuwa aynu dhaleecaynayno, Ilaah u barinnaa?"** Habase yeeshee nebi Ibraahim iyo Luut way is-qabteen. Nebi Ibraahim ma jeclaysan inuu Luut kula dagaallamo dhulka wanaagsan. Wuxuu ku yiri, halkee baad doonaysaa wiilkay-giiyow inaad degto.

Luut wuxuu doortay dhulkii wanaagsanaa ee ku dhowaa Sodom iyo Gomora oo lagu tilmaamay inuu ahaa dhul barwaaqo badan oo lahaa naq iyo doog

jilicsan oo xoolaha u wanaagsan. Markii Luut dhulkii wanaagsanaa doortgay ayaa Ibraahimna isaga soo tegay, oo wuxuu qaatay dhul aan xoolaha u wanaaganayn, oo aan welibana doog iyo naqba lahayn.

Waxaa dhacday markaas in dhibaato ay kala soo deristo Luut dhulkii uu doortay, oo ahaa dhul ay ku badnaayeen dad ciyaala-suuq ah oo aan waxba ka xirmin. Waxaa dhulkaas ku badnaa niman aan lagu soo hoyan, oo weliba sharnimada caadaystay. Ilaahna go'aan buu ku gaaray inuu burburiyo Sodom iyo Gomora. Ibraahimna lagama qarin, oo Ilaah uu u sheegay inuu burburinayo magaalooyinka Sodom iyo Gomora.

Ibraahimna markuu maqlay Ilaah buu u baryey kuwii xaqa ahaa ee magaalada degganaa. Waxaa keliya oo magaalada laga helay Luut oo isagu ahaa nin xaqa ah oo magaalada degganaa. Waxaana badbaaday, sidaan wada garanayno, Luut iyo labadiisii gabdhood. Xitaa xaaskiisii ma badbaadin, waayo waxay diidday inay maqasho warkii Ilaah.

Waxaa lagu yiri Luut iyo qoyskiisii, magaalada gadaal ha u soo fiirinina markii aad ka baxaysaan, laakiin iyadu gadaal bay u eegtay, markaasay noqotay iyadii oo dhan sida tiir cusbo ah. Haddaba markii qofka loo sheego eray Ilaah ka yimid ee uu qaato, la dooni maayo in wixii laga soo waday uu dib u eego, haddii kale way u dhammaanaysaa. Runtii laguu sheegay iyo wixii lagaa soo waday is-waafaqi maayaan, markaa noloshaada dambe ayaa ka sii xumaanaysa noloshaadii hore. Haweenaydii Luut qabay magaalada ayey ka samri la'ayd, oo waxay ku

lahayd dad badan oo ay jeceshahay. Bil-xaqiiqa waxay ahayd haweenay magac ku leh magaalooyinka Sodom iyo Gomora.

Waxay hormood u ahayd ururrada haweenka magaalada, waxaana suuragal ah inay baayac-mushtar xoog leh ku haysatay. War rumayn kari la'ayd in magaalada Sodom la burburinayo, oo Gomorana la gamaarin doono. Waxaa suuragal ah inay dood ka dhex socotay iyada iyo Luut oo ay lahayd, **"War maxaannu magaalada uga baxaynaa?"**

Isaguna wuxuu ku lahaa, **"Magaalada waa la burburinayaa, oo raggii martida ii ahaa, waxay ahaayeen malagyadii Rabbiga."** Asbaabta kale ee ay magaalada gadaal ugu soo eegtay waxay ahayd, inaanay Ilaah rumaysnayn. Balse Ilaah magaalada wuu baabi'iyey si ay cashar innaga nool maanta inoogu noqoto.

Oo in Luut la badbaadiyo waxay masaal u tahay sida kiniisadda Masiixa dunida looga qaadi doono. Waxaa kiniiadda ay dhulka ka tegaysaa intaan wakhtiga dhibka badanu billaaban, oo aan la gaarin wakhtiga Ilaah dunia xukumayo, waayo Ilaah u oggolaan maayo muuminiintiisa ay soo gaaraan wakhtiga dunida lala xisaabtami doono. Waxaana loo samatabbixin doonaa sidii Luut looga samatabbixiyey burburkii iyo halaaggii Sodom iyo Gomora.

Waana tuaasle wanaagsan oo inoo tilmaamaya sida kiniisaddu uga gudbi doonto dhulka. Waxaana iyaga xaq looga dhigi doonaa, waa masiixiyiinta e, rumaysadka ay ku qabaan Ciise Masiix, ninkan Luut ahna waxaa xaq looga dhigay rumaysadkiisa. Haddaan horey idiinku sii wado meeriska Warqaddan labaad

ee rasuul Butros, ayaannu imminka idiin akhriyeynaa aayadda 9aad ee cutubkan labaad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Rabbigu waa yaqaan sida kuwa cibaadada leh jirrabaadda looga samatabbixiyo iyo sida kuwa aan xaqa ahayn loo hayo iyagoo ciqaaban ilaa maalinta xisaabta."

Haddaba kuwa ay la tahay in kiniisaddu ay gaarayso wakhtiga dhibka weynu dunida ka bilaabanayo, ayan u sheegayaa in Ilaah garanayo sida kuwiisa dhibka looga samatabbixiyo. Waxaa laga yaabaa in adigu aadan garanaynin sida dhibatooyinka soo socda looga samatabboxo. Balse Ilaah wuu garanayaa sida kuwiisa looga samatabbixiyo dhibka. Wuxuuna kaloo garanayaa sida loo kala saaro kuwa sharka leh iyo kuwa cibadada leh.

Wuxuuna kala siinayaa hadiyadahooda kala duwan, waayo waxaa qorniinku leeyahay, **"Nin waliba waxaa loogu abaal-guday sida shuqulladiisu yihiin."** Markaa Hadallada Ilaah weli waxay gaarayaan insaanka, oo maalin maalmaha ka mid ah ayuu kala saarayaa kuwa xaqa ah iyo kuwa aan xaqa ahayn, waa maalinta cibaada-laawayaasha loo xukumi doono dembiyadooda loo hayey ilaa wahti dheer, waana marka ay ka hor-muuqan doonaan carshiga weyn ee Cad, oo xisaab loo soo hor fariisan doono.

Weli waxaannu ku jirnaa meeriska cutubka 2aad ee Warqaddan labaad ee rasuul Butros, waxanan imminka idiin akhriyayaa haddaba isla warqaddan labaad ee rasuul Butros cutubka 10aad,w axaana Qorniinku leeyahay sidatan:

"Khusuusan kuwa jidhka raaca, iyagoo damaca

nijaasta ah ku socda, oo sayidnimada quudhsada. Iyagu waa indha adag yihiin oo waa macangag, kamana cabsadaan inay kuwa derajada leh caayaan." Waxaa rasuulku imminka leeyahay: **"Kuwa jidhka raaca, iyagoo damaca nijaasta ah ku socda..."** Waxaa rasuul Butros imminka uu u hadlayaa si kharaar ama kulul, oo wuxuu leeyahay: **"Khusuusan kuwa jidhka raaca."** Kuwa ciqaabta loo hayo waa kuwa jidhka raaca ama jece inay wax badan nafsadda u raaxeeyaan, oo raaxada naftooda u haliga dad badan. Waxay ka fakaraan jidhkooda ama sidii ay nafsaddooda ugu raxayn lahaayeen ama u daryeeli lahaayeen. Wa kuwa aan aranaynin xushmadda dadka ka waaweyn, oo aan cisaynin ragga aqoonta leh ee ka tirsan qoomiyaddooda. Waa niman madax adag oo cid ay derajo u hayaan ma leh haddiiba ay arkaan inay ka soo hor-jeedaan hunguri-weynankooda.

Haddaan intaas ku soo ekayno casharkeennii caawa ayaan ku calool-fiyoobahay in saaxiib casharrada aad wax badan ka baranayso. Haddii markaa ay su'aalo kaala soo gudboonaadaan casharradayada, ama aad talo inoo soo jeedinayso, cinwaankayaga e-mailka inoogu soo qor. Haddaadan e-mail haysaninna, inoogu soo qor santuuqa boostada ee aan dhammadka barnaamijka idinku siin doonno.

SONG: REEL----CUT-----

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe **(hadahan oo kale)** isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka

dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.
Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin.